



# Cigaal shiidaad Iyo Hashiisii Webi

Leveled



Af Somali



Buuggan akhriska dheeriga waxaa maalgalisay hay'ada USAID. Waxaana si wada jir ah isaga kaashaday daabcayna hay'ada Save the Children, wasaarada waxbarashada heer federal iyo xafiiska waxbarashada DDSI.

2009 T.I.



The CC By license lets others distribute, adjust, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.

For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>



# Cigaal shiidaad Iyo Hashiisii Webi

Fasalka 3

| Toddobaadka 8



## Baraha qaaliga ahow

Waxaa buugan luugu talagalay in uu kobciyo awooda akhriska ee radayda fasalka 3<sup>aad</sup>.

Waxaaana lagu saleeyay manhajka cusub ee af-soomaaliga. Doorarka baruhu aad ayuu mihiim ugu yahay in ardaydu ka faa'iidaystaan buugan.

Sababtoo ah waxaa laga raba baraha in uu ku booriyo ama ku dhiirigaliyo carruurta in ay akhristaan buugtan. Hadaba baruhu waa in uu raaca talaabooyinkan soosocda, marka ay tahay ardaydu in ay ku akhristaan fasalka gudahiisa.

1. Ka hor intayna ardaydu akhrinta sheekada bilaabin, waa in uu baruhu weydiiyaa su'aalaha ka horeeya sheekada.
2. Waa in uu baruhu ardayda siiyaa waqti fiican ooy ku akhrin karaan sheekada.
3. Baruhu waa in uu usheegu ardayda in ay ku celceliyaan akhriska sheekada.
4. Ardaydu markay dhammeeyaan akhiska sheekada, baruhu waa in uu waydiiyaa su'aalaha ku qoran dhammaadka sheekada.

### Laylis

Su'aalaha akhriska ka hor

1. Maxaad ka taqaan tiqaan cigaal shiidaad?

## Hordhac: Qaybahe sheekooyinka

Af-soomaaligu wuxuu hodan ku yahay sheekooyinka waxayna u qaybasamaan qaybo farabadan waxaana ka mid ah sheeka xarriirta. Sheeka xarriirtu waxay ka midtahay sheekooyinka ku wooda ugu caansan oo marka sheeko carruurta horaba carruurnimada lagu barto. Sheeko carruureeda waxaa la yidhaa sheekada lagu madadaaliyo carruurta. Waxaana loogaga sheekeeyaa siyaabo badan waxayna u leedahay carruurta fa'iidooyin badan.

Faa'iidooyinkaa waxaa ka mid ah barasshada afka hooyo, barashada deegaanka iyo dugaagga ku nool, barashada taariikhaha dadkii hore.

Sheeko waa wax la isu sheego oo xikmad ku fadhida. Qof ayaa sheega sheekada kuwa kalana way dhegaystaan. Sheekada waxaa loo qaybiyaa saddex qaybood oo kala ah:

1. Sheeko dhab ah
2. Sheeko baralay
3. Sheeko carruureed

Hadaba sheekadan oo kamid ah sheekooyinka caanka ah ayaa waxay ka hadlaysaa Cigaal shiidaad iyo hashiisii webi.



## Cigaal iyo hashiisii Webi

Cigaalshiidaad oo reebay sheekooyin aad yaab iyo amakaag u leh qosolna ka buuxdo Ayaa wuxuu ku tilmaanaa nin aad fulay ah Cigaalshiidaad wuxuu ka tagay sheekooyin taariikh iyo murtiyo ka buuxdo. Sida sheekooyinkiisaba laga garan karo Cigaal shiidaad wuxuu u dhashay deegaanka soomaali itoobiyamala hubac, inaga xaqiji! Waxaa kale oo ay sheegaan dadka sheekooyinka Cigaal aadka u yaqaana in Cigaal ahaa nin xoolo dhaqata ah oo miyiga ku noolaa.

Arritaasna waxaa laga garan karaa sheekooyinka cigaal badidooda sheekooyinka Cigaal shiidaad laga dhaxlay waxaa weeye kuwo ay qosol badani ku jiraan. Sheekooyinkaas oo ah kuwo badi dadka soomaaliyeed wada yaqaanaan. waxaana lagu tilmaamaa in badankoodu yihiin kuwo aan laga xiisa dhicin waligood. Meelaha qaar kood waxaa laga yaabaa in sheekada laba qaab loo kala yaqaan taasina wax dhibaata ah malaha. Maalin maalmaha ka mid ah ayuu Cigaalshidaal baa geeloodii raacay. geela wuxuu ku lahaa hal u gooni ahayd oo wax kasta ka qiimo wayneed oo la odhan jiray webi.



Wuxuu maalintii oo dhan geela la joogaba  
gooray ahayd casar gaaban ayuu arkay  
hashii oo libaax cunayo. Cigaalbaa intuu  
cararay geela intiisii kale deg deg u  
uruuriyay oo uu duubay markaasna  
naxdintii hees aan loo fadhiyin uu geeli ugu  
heesay oo wuxuuna yidhi.

Wixii webi cunay

Waan arkaayo

Wuu ilgiirnaa

Wax dameer le'eg

Oo kadaba weyn


Yuu ahaayoo

Waan ujeedoo

Waan arkeyoo

Anse kama celin

Habayo hidow.



Markii uu Cigaal u heesayay geela waxaanu ujeedin nin geeljire ahaa oo maqlayay heestii si fiican u qabsaday. Wuxuu Cigaal geelii u heesaba markuu xareeyay ayuu is yidhi war barrito yeelkeede caawuun ha qadin. Intuu walaalkii oo ka yar u tagay buu ku yidhi walaal maantoo dhan baan geela lasoo joogay waanan gaajaysnahaye hashada sulub aan maalo ee adna webi

maal markay xigsimooto? Walaalkiibaa yeelay markaasu Cigaal hashi sulub maaley oo uu seexday.

Markii geela badankiisa lamaalay, ayaa webi la isyidhi maala (lisa). Ileen waa hal maqane waa la waayay. Cigaalbaa la toosiyay oo la weydiiyay hashii webi.

Isaga oo isluleysiinaya buu yidhi. War hashu geelay lasocotee qolqolka ka eega”. Markii laga quustay hashii webi ayaa Cigaal layidhi war halkee kuugu dambaysay?

Cigaalbaa yidhi Hashii xeraday ila soo gaadhay, malaha wey xero waydaaratay?.

Hashii baa la raadiyay markaasas baadi doonkii Alla ku hagaajiyay ninkii heesta Cigaal maqlayay. Waa la iswareystay war maxaa lagu soo hoyday? Baadi doonkii webi baa yidhi wax dhiilo ah ma ogine idinkuse” ninkii heesta webi maqlayay baa yidhi.



Wax dareen ah ma ogin halbaase naga dibjirtay ee waxba ma'aragteen? Maya oo goormay luntay?" shakibaaba nagaga jira ee ninkii geela raacay war kama hayno" oo hasha magaceed? Webi oo miyaad aragtay? Maya ma arag hase yeeshee, waxaan maqlay ninka la joogay geela oo magaceedii ku heesayay. Oo muxuu lahaa? Ninkii wuxuu u sheegay baadi-doonkii heestii Cigaal

webi u tiriyey. Baadi doonkii oo markan quustay baa gurigii ku soo noqday oo ku sii tashaday in Cigaal goobtii webi lageeyo oo indhihiisa wax latuso.

Markii gurigii lagu soo noqday ayaa Cigaal cadho lagula dhacay oo layidhi. ” Hadda kac oo natus raqdii hasha aan libaaxii soo dilnee.

Ciidankii baa hub qaatay iyo xadhig gaar ah. Intii dhexda lagu jirey bey Cigaal weydiyeen. War waxa isha giiran ee aad aragtay ma waraabuu ahaa? Markaasu u jawaabay oo yidhi.

Dee mayee waa ka waynaa oo wuxuu ahaa wax dameer le'eg una maleeyay libaax.

“oo maxaad uga ridi wayday ood u bireyn weyday? Ciidankii baa weydiiyay.

“War miyeydaan maqal libaax nin aan aqoonbaa lax ka rita, nimankii” iyagoo Cigaalkusii huruufaya, magacaaba meel xun Alla ku dhig; ayay hashii gaadheen.

Waxay u yimaadeen raqdii hasha oo keliya, ciidankii baa ku tashaday in ay dul seexdaan oo libaaxii si uun loo dilo. Hase ahaatee, Cigaal waa cadaystay markiiba oo wuxuu yidhi waryaada war nimanka anigu libaaxii webi cunay u badheedhi mayee oo gegidan seexan maayo innaga mariya”.



Ciidankii baa kula booday oo yidhi:  
wadnaha cad kaa go'yee sow anagaba  
kulama joogni miyaad naga nafjeceshahay?  
Aniga iyadoo afarta geesood la iga seexo  
mooyee seexan mayo” Cigaal baa yidhi  
waa hagaage naga seexo halkiibaa la  
seexday. Cigaal waa nin maantoo dhan geel  
ilaalinayee markiiba wuu khuuriyay.

Cabbaar markii la jiifay ayaa libaaxu soo  
dhigtay markaaba Cigaal mooyee, intii




kale illayn diyaarbay u ahaayeen gantaalo waramo ah sida roobka loogaga dhigay oo halkaa lagu dilay.

Meydkiisii inta la soojiiday oo sidii wax nool laga dhigay ayaa Cigaal lugta loogu xidhay oo laga fogaaday. Dhagax iyo qoryo yar yar ayaa lagu soo tuur tuuray.

Cigaal ayaa soo booday wuxuu arkay libaaxa agfadhiya! Goor Alla goor uu booday oo xadhigii goostay mooyee, cigaalbaa sida leebka is-ganay isagoo samada ka qaylinaya” war hayaay!

Hayaay!... Hayaay!.. Colkii kale ayaa intay qosol jaanta wadheen ka daba yaacay oo gaadhay.

Halkaa waxaa ka cad fulaynimada Cigaal shiidaad oo ahayd mid caan ah oo la wada yaqaanay.



## Gabagabadii iyo Gunaanadkii

Cigaal shiidaad wuxuu ahaa nin xikmad badan oo sheekooyinkii soodhan waxaa ku jira kaftan iyo ciyaar. Cigaal shiidaad ma ahay nin fulay ah oo qudha ee wuxuu lahaa garasho dheeraad ah oo eebe siiyay. Sheekooyinkisa qaar waxaad moodaa in uu dadka wax u sheegayay oo uu xikmad wayn ka tagi jiray sida habeenkii isaga oo guuraya uu arkay geedka madaw ee uu habeenkii oodhan u gabanayay.

Aroortii markuu waagu baryay ee uu arkay in wuxuu xaloo dhan ka gabanayayuu geedyahay ayaa wuxuu yidhi maahmaahdiisii caanka noqotay ee ahayd (geed yahaw ma waxaan ku mooday mise waxaa tahay mise waxaan loo noqonayn waxaan ku mooday bahal waxaadse noqotay geed waxaanse loo noqonayn guure habeenimo oo danbe). Sheekadan oo qudha maaha cigaal shiidaad wuxuu lahaa sheekooyin badan oo markii danbe maahmaah noqotay

## Laylis

Ka jawaab su'aalahan

1. Cigaal muxuu geela usoo duubay?
2. Heestu maxay tilmaamaysaa?
3. Sheeg siduu Cigaalhabeenkii isu dabareeye?
4. Waa maxay dulucda sheekadu?

